



Sawirka: Anna Valli

Ku fayoobida Espoo



Sawirka: Olli Urpela

**Adeegyada dowladda hoose ee
taageeraya fayoobida iyo ka qaybgalka**





Sawirka: Olli Urpela

Fayoobidaadu waa muhiim!

Espoo waxay bixisaa adeegyo guud iyo kuwo gaar ah oo kala duwan oo u oggolaanaya dadka deegaanka inay ku raaxaystaan layliska, waayo-aragnimada dhaqameed, hawlaha la wadaago, hiwaayadaha farxadda leh iyo sixirka waxbarashada. Ururo iyo naadiyo badan ayaa sidoo kale bixiya hawlo iyo taageero macno badan leh.

Sawirka: Sami Perttilä



Jawaab-celinta laga helay dadka deegaanka waxay muujinaysaa rabitaankooda ku aadan nolosha maalinlaha oo fudud, adeegyada iyo dhaqdhaqaaqa iyo sidoo kale magaalo firfircoon oo leh dareen bulsho oo xooggan. Bay'o maxalli ah, deegaan nadiif ah iyo arrimaha deegaanka ayaa sidoo kale muhiim u ah dadka deegaankeena. Espoo waxay doonaysaa inay maalgeliso dhammaan dhinacyadan.

Espoo waxay doonaysaa inay ilaaliso sinnaanta iyo takoor la'aanta ku teedsan dhammaan hawlaha. Maadaama aynu nahay magaalo dhaqamo badan iyo luuqado badan leh, waxaanu sidoo kale isdhexgalka ka taageernaa dhinacyo badan. Waxaan rabnaa in Espoo ay noqoto meel fiican oo ay ku noolaadaan dhammaan dadka ku nool deegaanka.

Enemmän läheltä

Seuraa somessa:
@entresse

ENTRESSE
KAUPPAKESKUS

Siltakatu 11, Espoo
entresse.fi

Sida ay magaaladu kor ugu qaaddo fayoobida dadka deegaanka ku nool

Horumarinta aqoonta iyo dhaqanka

- Waxbarashada carruurnimada hore
- Waxbarashada aasaasiga ah
- Waxbarashada guud ee dugsiga sare
- Waxbarashada farsamada gacanta iyo tababarka
- Waxbarashada dadka waaweyn ee guud ahaan
- Adeegyada fanka iyo dhaqanka
- Adeegyada maktabadda
- Adeegyada dhallinyarada
- Adeegyada isboortiska iyo jimicsiga
- Daryeelka ardayda (oo ay weheliyaan degmada adeegyada fayoobida)

Horumarinta deegaanka lagu nool yahay

- Siyaasadda dhulka
- Qorshaynta magaalada iyo qorshaynta isticmaalka dhulka
- Gaadiidka, gaadiidka dadweynaha
- Dhismaha iyo dayactirka shabakadda wadooyinka
- Qaybinta biyaha iyo bulaacadaha
- Maareynta qashinka
- Soo saarida tamarta iyo qaybinta
- Adeegyada xakamaynta dhismaha
- Adeegyada guriyeynta
- Ilaalinta deegaanka iyo daryeelka caafimaadka
- Amniga iyo u diyaarsanaanta

Horumarinta furfurnaanta nolosha magaalada

- Soo jiidashada magaalada
- Adeegyada shaqada iyo ganacsiga
- Taageerada shaqsiyaadka ay adagtahay in la shaqaleysiiyo, wacyigelinta shaqada dhallinyarada, aqoon iswaydaarsiyada, ka-hortagga shaqo la'aanta muddada dheer, ka shaqaynta degmooyinka, isdhexgalka
- Siyaasadda warshadaha: talada ganacsiga, suuq-geynta aagga, xogta furan
- Dhaqamada kheyraadka xikmadda leh
- Bixinta dhulalka: shirkadaha, guriyaynta, adeegyada

Horumarinta aqoonsiga deegaanka iyo dimuqraadiyadda

- Fursadaha ka qaybgalka ee kala duwan
- Dareenka bulshada ee heer deegaan ahaan
- Isgaarsiinta, isdhexgalka iyo adeegyada luqadda
- Dimuqraadiyadda doorashooyinka iyo wakiillada
- Fursadaha ku aadan hawlaha NGO-yada
- Hawlaha gaarka ah ee dadka deegaanka
- Qaababka cusub ee dimuqraadiyadda
- Dhaqamo badnaan

Waxaa laga soo xigtay qoraal ay soo saartay Ururka Maamullada Deegaanka iyo Gobolka ee Finland.



Degmada Adeegyada fayoaqabka ee Galbeedka Uusimaa (Western Uusimaa Wellbeing Services County) ayaa mas'uul ka ah adeegyada caafimaadka iyo bulshada ee ka jira Espoo.



Wax badan ka sii akhri (ku qoran Af-Finnish): luvn.fi



Season Golf

Ympäriuvotista Golfharjoittelua Finnoossa

- ✓ 48 sisälyöntipaikkaa ja 28 katettua ulkolyöntipaikkaa
- ✓ Laadukkaat sisä lähipelialueet
- ✓ TrackMan-simulaattorit ja -lyöntipaikat
- ✓ Laadukas Golfopetus
- ✓ Golfkuntosali
- ✓ Lounge aktiivisiin yritystapahtumiin

Finnoonuisto 4, 02280 Espoo | 050 329 1320 | seasongolf.fi

Ku socoto waddada koritaanka iyo waxbarashada

Espoo, waddada korriinka iyo waxbarashadu waxay ka bilaabataa waxbarashada carruurnimada hore waxayna sii socotaa ilaa waxbarashada dugsiga sare. Waxaan rabnaa in aan hubinno in dhammaan carruurta iyo dhallinyarada da' yarta ay helaan fursadaha ugu wanaagsan ee ay ku kobcaan, ku koraan, wax ku bartaan oo ay kaga qaybqaataan hawlaha la hago iyo kuwa wakhtiga firaaqada labadaba.

Waddo waxbarasho oo toosan oo loo siman yahay oona taageerta fayoobida ayaa si wadajir ah loogu dhisay carruurta, dhallinyarada iyo qoysaskooda iyo sidoo kale iskaashatada magaalada.



Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish):
espoo.fi/kasvatus-ja-opetus



Sawirka: Marika Tuominen



**Mutkaton ostospaikka
Niittykummun sydämessä**

Seuraa meitä  

NITTY
KAUPPAKESKUS



Sawirka: Elena Savina

Nuori Espoo – hawlaha dhallinyarada

Nuori Espoo waxay bixisaa waxqabadyo madadaalo leh, munaasabado, khibrado iyo taageero maalinle ah oo loogu talagalay dadka dhallinyarada ah. Waxaanu haynaa 20 xarumood oo dhallinyareed oo leh hawlo goobta ah iyo kuwa onlayn ah iyo sidoo kale laba unugyo shaqo oo dhallinyareed oo dhaqdhaqaaqa oo loo yaqaano Kerttu iyo Keijo – iyo dabcan koox wanaagsan oo maamusha adeegyadan. **Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish): espoo.fi/nuoriespoo**

Dugsiyada sare ee guud ee Espoo

Espoo ardaydu waxay ka dooran karaan waxbarasho kala duwan oo dhiiragelinaya. Waxaan sidoo kale bixinaa fursadaha takhasuska – tusaale ahaan, sayniska, fanka, isboortisga iyo caalamnimada. **Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish): espoo.fi/lukiot**



Sawirka: Taru Turpeinen

Ohjaamotalo waxay ka caawisaa caqabadaha maalinlaha ah

Ohjaamotalo waxaa loogu talagalay dadka Espoo deggan ee da'doodu ka yar tahay 30 sano. Dukaanka hal joogsiga ah wuxuu ka caawiyaa arrimaha la xiriiira waxbarashada, doorashooyinka shaqada, shaqo raadinta, maareynta nolosha, dhaqaalaha gaarka ah iyo guriyeynta, tusaale ahaan.

Waxbarashada fanka

Magaalada Espoo waxaa ka jira ilaa 20 bixiyayaal ee waxbarashada aasaasiga ah ee farshaxanka. Doorashadooda noocyada farshaxanka waxaa ka mid ah qaab-dhismeedka, farshaxanka muuqaalka, farsamada gacanta, farshaxanka warbaahinta, muusiga, fanka suugaanta, qoob ka ciyaarka, masraxa iyo bandhigyo masraxeed. Dugsiyadu waxay qaadaan lacag, laakiin qiimo dhimisyo iyo meelo bilaash ah ayaa sidoo kale la heli karaa.



Sawirka: Kira Hermonen

Ma xiisaynaysaa kobcinta aqoonta ama hawl karnimada?

Omnia, oo ah Maamulka Wadajirka ah ee Waxbarashada ee Gobolka Espoo, waxay bixisaa waxbarasho heer sare ah oo kala duwan. Waxaad dhammaynsan kartaa xeel-dheeri aqoon, waxaad yeelan kartaa xirfado cusub ama waxaad horumarin kartaa aqoontaada jirta. **Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish): omnia.fi**

Waxbarashada nolosha dheer

Xarunta Waxbarashada Dadka Waaweyn ee Espoo iyo Arbis-ka ku hadla af Iswidhishka waxay bixiyaan kumanaan koorasyo ah oo isugu jira isboortis ilaa luqado iyo dhaqan iyo IT ilaa farshaxano iyo mowduucyo bay'ada la xiriiira. Koorasyadu waxay u furan yihiin dadka da' kasta leh.

Etelä-Espoon Pallo ry on Matinkylän, Olarin ja Suurpellon alueella toimiva jalkapalloseura, jonka toiminnassa on mukana jo yli 900 pelaajaa.

EsPa tarjoaa laadukasta valmennusta ja joukkueemme harjoittelevat erinomaisissa olosuhteissa ympäri vuoden. Espalaisuus alkaa jalkapallokoulusta 4-5 vuotiaana ja voi jatkua aina EsPan edustus-joukkueeseen. Seura tarjoaa myös harrastefutista.

Tervetuloa mukaan!



**PARASTA
PAIKALLISTA
JALKAPALLOA**

www.etelaespoonpallo.fi

EsPa_ry EsPa_ry

Magaalo dhaqan ka buuxo

Espoo waa magaalo leh dhaqamo badan oo kala duwan. Maktabadaheena, matxafyadeena, tiyaataradeena iyo kooxdeena muusigada waxay bixiyaan khibrado dhaqameed sanadka oo dhan. Magaaladu waxay sidoo kale qabanqaabisaa munaasabado dhaqameed kala duwan iyo waxqabadyo madadaalo oo loogu talagalay dadka da' kasta leh.



Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish):
espoo.fi/kulttuuri-ja-vapaa-aika



Sawirka: Tanu Kallio



**LASTENTEATTERIA ESPOOSSA
JO VUODESTA 1975
TERVETULOA SATUJEN KOTIIN!**

Juhannusmäki 2, Espoo / p. 09 4391 220



**TEATTERI
HEVOSENKENKÄ**

hevosenkenka.fi



Sawirka: Elena Savina

Wacitaanka Dhaqanka

Wicitaanka Dhaqanku waxa uu dhaqanka keenaa xannaanada maalintii ee magaalada Espoo. Xirfadlayaasha fanka iyo dhaqanka waxay booqdaan xarumaha xannaanada maalintii si ay u qabtaan oo ay u hagaan waxqabadyada loo qorsheeyay carruurta oo ay ku dhiirageliyaan shaqaalaha inay ka faa'iidaystaan farshaxanka waxbarashada carruurnimada hore.

KULPS waxay dhaqanka ku keentaa dugsiyada

Dariiqa dhaqanka iyo ciyaaraha KULPS waa nidaam gaar ah oo magaalada Espoo laga sameeyay si kor loogu qaado sinnaanta ka dhexeysa carruurta dugsiya. KULPS waxay u ogolaataa carruurta inay booqdaan xarumaha dhaqanka iyo ciyaaraha bartamaha maalinta dugsiya taasoo qayb ka ah waxbarashada. Waxqabadyadu waxay lacag la'aan u yihiin dugsiyada.

Hiwaayad cusub oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinta da'yarta ah oo ka yimid Dariiqa Hiwaayadda

Dariiqa Hiwaayadda ee Espoo waxay ka caawisaa carruurta iyo dhallinta da' yarta ah inay helaan



Sawirka: Sami Perttilä

hiwaayad madadaalo ah oo bilaash ah. Ma jirto khibrad ama xirfad hore oo loo baahan yahay.

Booqo maktabadda ama matxafka!

Maktabadaha waa xarumo dhaqameed u furan dhammaan. Ururintooda waxa ka mid ah buugaagta, majaladaha, wargeysyada, muusiga iyo agabyo kale. Waxaad sidoo kale wax ku baran kartaa, ka qaybqaadan kartaa hawlaha madadaalada oo aad arki kartaa bandhigyada ka dhaca maktabadaha.

Matxafyada Espoo, waxaad ka baari kartaa taariikh dhaqameedka magaalada, fanka casriga ah, ciyaarta iyo alaabaha carruurta ku ciyaarto, iyo waxyaabo kale oo badan.

Tiyaatarka iyo muusigada

Sannad kasta, Tiyaatarka Magaalada Espoo wuxuu soo saaraa bandhigyo kala duwan wuxuuna qabanqaabiyaa kulammo fannaanin, isbarasho iyo aqoon-is-weydaarsiyo la xiriira.

Tapiola Sinfonietta iyo Espoo Big Band waxay khibrado muusig oo tayo sare leh siiyaan taageerayaasha muusiga qadiimiga ah, pop iyo jaaska.



Kaarka Kaikukortti, oo si ikhtiyaari ah loo bixiyo, wuxuu dadka dhaqaale xumada ay haysato fursad ugu siinaya inay si lacag la'aan ah ugu raaxaystaan fanka iyo dhaqanka. Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish): [espoo.fi/kulttuuri-ja-vapaa-aika/kaikukortti](https:// espoo.fi/kulttuuri-ja-vapaa-aika/kaikukortti)

Espoon Kaupunginteatteri The International Theatre of Finland

Ajankohtaisuutta & laatua.
Kokellisuutta & taide-elämyksiä.
Tarinoita & yllätyksiä!

Espoolaisten oma teatteri

Surtitles in mobile app
(usually in Finnish & in English)

[espooonteatteri.fi](https:// espooonteatteri.fi)

[lippu.fi](https:// lippu.fi)

**ESPOON
KAUPUN
GINTEAT
TERI**
The International
Theatre of Finland

Ka fayoobida bay'ada

Magaalada Espoo, bay'ada ayaa had iyo jeer mid dhow ah. Central Park, Nuuksio National Park, jasiiradaha iyo meelaha kale ee dabiiciga ah waxay ku martiqaadaan dadka da' kasta iyo awood kasta leh inay ku raaxaystaan oo ay wax badan ka bartaan bay'ada. Magaalada Espoo waxaa ku yaalo taallooyin dabiici ah oo qiimo badan oo la ilaaliyo, goobo juquraafi iyo muuqaalo dhuleed oo taariikheed.



Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish):
espoo.fi/liikunta-ja-luonto

Sawirka: Sami Perttilä

Waddada dabiiciga ah ee la mari karo “Korennen kierros” ee ku yaalo Lakisto (Waqooyiga Espoo) ayaa sidoo kale ku habboon isticmaalayaasha kursiga curyaanka. Waxaa jira calaamado ku yaalo agagaarka waddada.

Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish):
hdl.fi/esteeton-luontopolku





Sawirka: Olli Urpela

Baar dariiqyada bay'ada

Waxaa jira dariiqyo bay'adeed oo calaamadeysan oo loogu talagalay in loo isticmaalo madadaalada. Agagaarka dariiqyadan, waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan bay'ada deegaanka iyo sifooyinkeeda gaarka ah. Waxaa sidoo kale jira dariiqyo dabiici ah oo la heli karo. Dariiqa dabiiciga ah ee Olari health wuxuu kuu ogolaanayaa, adigoo adeegsanaya jimicsiyo kala duwan, inaad ka nasato nolol maalmeedkaaga oo aad diirada saarto jirkaaga iyo maskaxdaada.

Adiga keligaa baad sahamin kartaa dariiqyada dabiiciga ah ama waxaad ku biiri kartaa dalxiis la hagayo.

Dhammaanteen waxaan wax u qaban karnaa deegaanka. Qof kastaa wuxuu mas'uul ka yahay ladnaanta bay'ada, waxaadna u horumarin kartaa kala duwanaanshaha noolaha siyaabo badan, tusaale ahaan deyrkaada gaarka ah.

Halkan ka akhri talooyinka iyo tilmaamaha (ku qoran Af-Finnish):
 [espoo.fi/liikunta-ja-luonto/tietoa-luonnosta/luonnonsuojelu/ohjeita-luontotekoihin](https:// espoo.fi/liikunta-ja-luonto/tietoa-luonnosta/luonnonsuojelu/ohjeita-luontotekoihin)



Sawirka: Patrik Fagerström

U bax booqasho jaziiradeed!

Jasiiradaha Espoo waxaa ka mid ah jasiirado dhowr ah oo qof walba u furan. Xilliga xagaaga, waxaad jasiiradaha ku geli kartaa doomo qorshaysan. Baaskiil wadayaasha ayaa sidoo kale lagu soo dhaweynayaa inay fuulaan.

Magaaladu waxay kor u qaadaa baaskiil wadida

Mashruuca magaalada ee 'Waa Sida Baaskiil Wadida Camal' waxa uu kor u qaadaa baaskiil wadida gudaha Espoo waxana uu bixiyaa koorasyo baaskiil wadista oo loogu talagalay dadka waaweyn ee aan baran in ay wadaan baaskiilka markii ay yaraayeen. Mashruuca waxay sidoo kale ujeedadiisu tahay in lagu kordhiyo nolosha baaskiilada iyadoo la raacayo mabda'a dhaqaalaha wareegga.

HALTIA



Koe Suomen luonto Haltiassa

Vuokraa varusteet ja nappaa reittivinkit retkellesi, nauti Haltian luontonäyttelyistä ja lähiruoasta. Osallistu luontokouluun, monipuolisiin tapahtumiimme tai järjestä oma tilaisuutesi meillä.

Suomen luontokeskus Haltia on portti Nuuksion kansallispuistoon sekä koko Suomen luontoon.

Nuoksiontie 84, Espoo
haltia.com | shop.haltia.com





Jimicsi samee sanadka oo dhan

Espoo waxay sanadka oo dhan bixisaa fursado badan oo ah isboortiga iyo jimicsiga, gudaha iyo dibadda labadaba, iyadoo ah qaab hawlo madaxbanaan iyo kuwo la hagayo. Adeegyada isboortiga qaarkood waxaa si wadajir ah loola bixiyaa naadiyada isboortiga. Adeegyada Isboortiga iyo Jimicsiga ee Espoo ee goobaha isboortiga gudaha iyo dibadda waxaa lagu keydin karaa iyadoo loo marayo shaantirsiga ballansashada elektiroonigga ah. Naadiyada isboortiga ee fadhigoodu yahay Espoo ayaa mudnaanta siiya marka wakhti go'an la siiyo isticmaalayaasha xarumaha isboortiga. Xarumuhu waxay wajahayaan dallacid lacageed.



Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish):
espoo.fi/espoo-liikkuu

Sawirka: Tuire Ruokosuo



Suomen Fysiovalmentajat Oy
info@fysiovalmentajat.com
 puh. 045 664 4014

EBK-Honka Areena, 2. krs
 Kylävainiontie 20,
 02760 Espoo

Valmennuksellista fysioterapiaa

- ✓ Haluaisitko olla terveempi ja samalla päästä eroon ärsyttävistä vaivoista?
- ✓ Haluaisitko aloittaa liikunnan vaivoista ja krempeista huolimatta?

Tule tutustumaan!

Tervetuloa, olemme pieni espoolainen perheyritys.

www.fysiovalmentajat.com





Sawirka: Vessi Hämäläinen

Jimicsiga heerka hoose ee dhow

Goobaha isboortiga ee xaafadaha waa goobo isboorti oo kala duwan kuwaas oo ay si bilaash ah ku heli karaan dhammaan dadka Espoo deggan. Waxaa laga yaabaa inaad jeceshahay inaad tijaabiso koorsada degdegasiinanimada iyo dheelitrnaanta ee ka baxa dugsiga Auroran koulu, kubbadda cagta panna ee dugsiga Jalavapuiston koulu ama kubbada miiska bannaanka ee lagu qabto beerta dadka deegaanka ee Tapiola.

La-talinta waxqabadka jireed waxay kaa caawineysaa inaad bilowdo

Sidee ayaan u bilaabaa jimicsiga? Isboorti nooc ee ah ayaan sameyn karaa? Macalimiinta jimicsiga

Espoo's Senioripaku (Hoomeyda Dadka Waayeelada ah) wuxuu u socdaalaa magaalada laga bilaabo Maajo ilaa Sebteembar wuxuuna bixiyaa, waxyaabo kale, jimicsi la hagayo, farshaxanada iyo dhaqanka, iyo adeegyada la-talinta. Waxqabadyadu waa lacag la'aan waxaana loogu talagalay dhammaan waayeellada ku nool Espoo iyo kuwa ay jecel yihiin.

Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish): espoo.fi/tukea-arkeen/seniorit/espoo-senioripaku



Sawirka: Sami Perttilä

ayaa bixin doona hagitaan lacag la'aan ah oo ku saabsan ciyaaraha iyo jimicsiga dadka da' kasta leh, gaar ahaan kuwa hadda bilaabay. Wac 09 8166 0800 si aad ballan uga qabsato la-talinta waxqabadka jireed.

Jimicsiga iyo fayooabaanta loogu talagalay waayeellada

Magaaladu waxay siisaa adeegyo isboortis iyo jimicsi bilaash ah dadka Espoo degan ee da'doodu tahay 68 iyo ka weyn oo haysta Xarig-gacmeedka Ciyaaraha +68. Xarig-gacmeedka waxa la bixiyaa laba sano markiiba.



Tarjoamme lapsille, nuorille ja aikuisille

**fysioterapia,
puheterapiaa ja
toimintaterapiaa**

**Tutustu Tonusen
25 ammattilaiseen – tonus.fi**

Puh. +358 9 8811 940

Piispantilankuja 4,
02240 Espoo

Tilkankatu 14 A 40,
00300 Helsinki

Magaalo waarta sida wadajir ayaa loo dhisi karaa

Magaalooyin bulsho ahaan waarta ma jiraan haddii aysan ka qaybqaadan dadka deegaanka iyo dimuqraadiyada. Bulshada bulsho ahaan waarta waxay ula dhaqantaa dhammaan xubnaheeda si isku mid ah, waxay taageertaa fayoobidooda, caafimaadkooda iyo awooddooda shaqo waxayna bixisaa amniga iyo adeegyada lagama maarmaanka ah.

Espoo waxay rabtaa inay xoojiso ka qaybgalka dadka deegaanka iyo dareenka bulshada. Waxaan macluumaadka u wadaagnaa si cad oo furan waxaana ka qaybgalinaa dadka deegaanka si ay u xaliyaan caqabadaha caadiga ah. Tani waxay kordhisaa kalsoonida waxayna wanaajisaa go'aan qaadashada. Waxaan sidoo kale taageernaa hawlaha dadka deegaanka annagoo amaahinayna qalabka, kireyna xarumaha iyo bixinta deeqaha.

Ka akhriso wax badan oo ku saabsan siyaabaha looga qaybqaadan karo iyo shaqada Espoo si kor loogu qaado ka qaybgalka dadka deegaanka (ku qoran Af-Finnish):



espoo.fi/osallistu-ja-vaikuta

Sawirka: Taru Turpeinen





Calaamadda 'shanta sare' waxay muujinayaan fursadaha ka qaybgalka.

Ku biir!

Ururo badan, kooxo mutadawaciin ah iyo isbahaysiyada xaafadaha ayaa dadka siiya fursad ay ku sameeyaan isbeddel oo ay si wadajir ah uga qaybqaataan hawlaha madadaalada. Waxaa sidoo kale jira kooxo taageero ah, waxaana lagaa caawinayaa shaqada guriga, tusaale ahaan.

Wax badan ka akhri: [lahella.fi](https://www.lahella.fi)

Ma abaabuli karaa munaasabad?

Espoo waxay leedahay meelo loogu talagalay xafladaha waaweyn iyo munaasabadaha yaryar ee maxaliga ah labadaba. Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan ogolaanshaha, goobaha iyo faahfaahinta kale ee muhiimka ah mareegta magaalada.

Dhallinyarada da' yarta ah ee ku nool Espoo waxay maqlida codkooda ka helaan Golaha Dhallinyarada, isbahaysiyada ardayda iyo miisaaniyad u dejinta ka qaybqaadashada (ManiMiitti).



Jawaab-celinta iyo waxqabadyada waxaa lagu soo diri karaa onlayn (ku qoran Af-Finnish): nuortenpalaute.espoo.fi



HIIHTOKESKUS

Serena Ski on etelän siistein hiihtokeskus! Meillä on yhteensä 8 rinnettä, joista varmasti löydät mieleisesi, olitpa sitten kovan tason kilpalaskija tai aloittelija. Serena Ski on myös monen parkkilaskijan lempikeskus kahden hauskan & haastavan street-rinteen ansiosta!

VESIPUISTO

Ulkovesipuistosta löydät mm. kauden 2023 uutuuden Tornimäet, huippuhauskan kaksinlaskettavan Half-Pipen, Suomen pisimmän liukumäen, yli 160-metrinen Rengasjoen sekä myös pienempien lasten suosikin Huvikeitaan. Sisävesipuisto tarjoaa tropiikin lämpöä ympäri vuoden! Aaltoallas, porealtaat, Tornado, ikiklassikko Villivirta... Tule Serenaan!



Serena
Tornimäentie 10
02970 ESPOO

 **020 5010 300**
 info.serena@puuhagroup.com

 **serena.fi**

Espoo Xamaasad Leh

Magaalada Espoo waxay doonaysaa inay noqoto magaalo mustaqbalka laga shaqayn doono, halkaas oo qaybaha aqoonta ay ku sii xoogaysanayaan oo ay ka abuuraan shaqooyin cusub oo kala duwan. Espoo oo saaxiib la ah ganacsiga waa deegaan hal-abuur caalami ah oo soo jiidasho oo xiiso u leh khibradda, sayniska, farshaxanka iyo ganacsiga.



Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish):
espoo.fi/tyoelama

Waxaan kaa caawin doonaa inaad hesho meelaha aad ku fiican tahay oo aad Espoo ku dhisto mihnadaada iyo noloshaada. Si wada jir ah, waxaan u furi doonaa habka lagu barto xirfado ama takhasus cusub, si ay u dhamaystiraan xirfadaha, si ay u bartaan shaqada ama si ay u helaan shaqo. Adeegyadeena iyo munaasabadaheena ayaa kaa caawin doona inaad dhisto aqoonsigaaga xirfadeed, kalsoonidaada iyo shabakadaha bulshadaada oo aad hesho shaqo-bixiye kugu habboon.



Adeeggeena shaqaalaynta waxa uu kaa caawin karaa arrimaha la xiriira shaqo raadinta. Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish):
espoo.fi/tyoelama/tyollisyys-espoo

Sawirka: Olli Urpela





Sawirka: Olli Urpela



Sawirka: Johanna Taskinen

Ma nabadbaa Espoo

Muhiim ayay noo tahay in noloshaada ay si habsami leh u socoto qof ku cusub Espoo ahaan. Bogagga Hello Espoo, waxaad ka heli kartaa tilmaamo ku saabsan marxalad kasta oo guuritaan iyo isdhexgalka



Wax badan ka akhri (ku qoran Af-Finnish):
helloespoo.fi

Xarunta Hibada Espoo

Ku biir bulshada, ku raaxayso quraacda boorashta ah oo ku soo wadaag khibradaada madasha Espoo Talent Hub. Inaad isdiwaangeliso looma baahna. Waxaa yaalo qaxwo iyo boorash badan oo qof walba helaayo. Waxaad ka heli kartaa madasha Espoo Talent Hub gudaha Otaniemi ee ku taalo Tekniikantie 4 C, laga bilaabo 8:00 ilaa 9:00 Talaadada labaad ee bil kasta.



Adeegyadeena loogu talagalay xirfadlayaasha caalamiga ah (ku qoran Af-Finnish):
espoo.fi/tyoelama/espoo-talent-hub/palvelumme-kansainvalisille-ammattilaisille

Talo guriyayn


Adeegga talobixin guriyanta oo loogu talagalay dhammaan dadka ku nool Espoo ayaa la bilaabayaa deyrta 2023. Ujeeddadeedu waa in laga caawiyo dadka deegaanka arrimaha la xiriira guryaha, sida helista guri cusub, dhammaystirka heshiisyada kiraynta, xallinta mashaakilaadka ku saabsan bixinta kirada ama khidmadaha dayactirka, ama xallinta khilaafaadka u dhexeeya kireeyayaasha iyo kiraystayaasha ama deriska dhexdooda.

AINOA

Sydämelttään suuri.

Kauppakeskus, joka ei halunnut kasvaa vain isoksi, vaan sydämeltään suureksi

Yli sadan liikkeen AINOA on uniikki yhdistelmä tapiolalaista tyyliä, rakkaudella rakennettuja erikoisliikkeitä ja kriittisempääkin kulinaristia hykerryttäviä ravintoloita ja kahviloita, joita et muualta löydä.



Täältä puutut oikeastaan enää sinä. Hyppää siis metroon, bussiin, autoon tai fillarin satulaan, niin nähdään kohta.

100+
liikettä

30
ravintolaa
ja kahvilaa





Horumarinta magaalo waarta

Espoo waxaa loo dhisay magaalo soo jiidasho leh oo ammaan ah iyadoo loo eegayo dadka deegaanka iyo hab ku jihaysan macaamiisha. Kobaca Espoo waa mid dhaqaale ahaan, deegaan ahaan, bulsho ahaan iyo dhaqan ahaanba waaraya.

Espoo waxaa ka go'an Hadafyada Horumarinta Joogtada ah ee Qaramada Midoobay (SDGs) waxayna la wadaagtaa khibradeeda horumarinta joogtada ah iyada oo loo marayo

shabakadaha magaalooyinka qaranka iyo kuwa caalamiga ah.

Xal waara oo casri ah ayaa nolol maalmeedka iyo dhaqdhaqaaqa ka dhigaya mid habsami leh oo u oggolaanaya dhammaan dadka degganayaasha Espoo inay sameeyaan doorashooyin waara oo saameyn ku yeeshaan deegaankooda maxalliga ah.

Waxaad sidoo kale Espoo ka heli kartaa baraha bulshada!



**Tervetuloa asioimaan
Kauppakeskus Länsituuleen
Tapiolan keskustassa!**

Länsituuleessa sinua palvelevat useat liikkeet ja ravintolat sekä lääkärikeskus ja kuntosali.

Tapiolan metroaseman yhteydessä,
hyvien yhteyksien varrella.

www.lansituuli.fi

LÄNSITUULI 10, 02100 ESPOO

LÄNSITUULI
KAUPPAKESKUS